**Department of Equity**
270 East State Street
Columbus, Ohio 43215
Phone 614-365-5626
tpollard@columbus.k12.oh.us

*Mission: Each student is highly educated, prepared for leadership and service, and empowered for success as a citizen in a global community.*

# *SU'AALAHA BADANAABA LA IS-WEYDIIYO (FAQ) ee la xiriira Imaanshaha Ardayga ee Waalidka*

***Maxay tahay sababta aan u helo warqad ku saabsan maqnaanshaha ilmahayga?***

Ohio gudaheeda, ardayga waxaa loo tixgaliyaa inuu yahay mid caadeystay maqnaansho haddii ardaygu maqan yahay **30 saacadood oo xiriir/xidhiidh ah** cudurdaar la'aan sharci ah ama **42 saacadood bil gudaheed** cudurdaar la'aan ama *72* **saacadood sannadkii** isagoon haysan cudurdaar sharci ah

***Maxaa loo arki karaa sabab sharci ahaan la ogolaan/aqbali karo oo looga maqnaanayo dugsiga?***

Guud ahaan, ka maqnaanshaha dugsiga waxaa loo arkaa mid sharci ah, ama maqnaansho cudurdaar leh, sababaha soo socda ee sharci ahaan la ogolaan/aqbali karo **(warqadda waalidka ama warqadda ilaaliyaha/wakiilka/masuulka oo saxiixan ayaa loo baahan yahay):**

- Jirro/xanuun qof-ahaaneed ama takoorid/karantiil.
- Jirro/xanuun ama dhimasho qoyska oo ged-gegg ah.
- Xaalado deg-degg ah ama xaalad kasta oo kale, taas oo, marka la eego xukunka/go'aanka maamulayaasha qof-ahaaneed/gaarka ah, waxa laga yaabaa inay u baahato maqnaanshaha dugsiga oo ah xalka ugu dambeeya.
- Fasax/munaasabad diimeed.
- Ballan caafimaad ama ilkeed (bayaan qoraal ah oo ka soo baxay dhakhtarka ama dhakhtarka ilkaha oo xaqiijinaya/cadaynaya ballanta ayaa loo baahan karaa).
- Booqashada kulleejada. Ka maqnaanshaha arday ee dugsiga sababtoo ah booqashadii kulleejada waxay u baahan kartaa xaqiijinta/cadaynta taariikhda iyo wakhtiga booqashada kulleejada, jaamacadda, ama kulleejada farsamada gacanta.
- Sabab kasta oo kale oo la cayimay/la qeexay si waafaqsan/lana raacayo sharciga Ohio

***Waa maxay maqnaansho cudurdaar la'aan ah?***

Maqnaanshaha ardayga ee aan la xaqiijin. Xafiiska dugsigu ma helin warqadda cudur daarka ee waalidka, dukumiinti ama ogaysiis ah sababta maqnaanshaha ama sababta maqnaanshaha cudur daar ma aha/ma laha cudurdaar/ marmarsiiyo sida ku cad Siyaasadda Guddiga 5200.01.

***Maxaan sameeyaa haddii ilmahaygu ka maqan yahay dugsiga?***

Waalidiinta iyo dadka ardayda masuulka ka ah waxay si toos ah u soo wici karaan dugsiga si ay uga warbixiyaan ama u wacaan khadka taleefoonka imaatinka/xaadirinta dugsiga oo ay uga tagaan fariin cod ah (oo ku taal bogga mareegta dugsiga) ka hor 9:30 a.m., ee subaxnimo maalin kasta. Waalidiinta iyo xannaaneeyayaasha waxay sidoo kale soo sheegi/so war-gelin karaan

maqnaanshaha ardayga iyaga oo u soo diraya iimaylka dugsigaaga ama imaylka imaanshaha dugsiga (oo ku yaal bogga mareegta dugsiga). Waalidka ama qofka ilmaha masuulka ka ah waa inay dugsiga ku keenaan warqadd cudurdaar/marmarsiiyo qoraal ah oo uu saxiixay waalidku labada maalmood gudahooda ee ardaygu soo laabtay. Haddii aan la helin warbixinta maqnaansho ama cudur daar oo qoraal ah, maqnaanshaha waxaa loo tixgelinayaa maqnaansho cudurdaar la'aan ah.

***Maxaa dhacaya haddii aan iloobo/hil-maamo/ku guuldareysto in aan soo diro qoraal/warqad cudur daar ah?***
Xeer ahaan, haddii aan waalidka/masuulka laga helin qoraal saxiixan oo muujinaya sababaha maqnaansho ee ardayga **48 saacadood gudahood**, maqnaanshaha waxa loo kala saari doonaa mid aan cudurdaar lahayn. La xidhiidh/xiriir dugsiga ardaygaaga wixii gargaar/caawimaad ah.

***Yaan la hadlaa haddii aan wel-wel/walaac ka qabo maqnaansho, daahitaan, ama ka daahitaanka fasalka?***
La xiriir/xidhiidh dugsiga ilmahaaga.

***Ardaygayga 5 ama 6 jirka ah ee dhigta xanaanada (kindergartenka) miyuu hoos yimaadaa Sharciga Imaanshaha Qasabka ah ee Ohio?***
Haa, marka ardaygaaga la qoro dugsiga, imaanshaha/xaadiritaanka qasabka ah ayaa lagu dabaqi/fulin karaa. QAYBTA 3321.13 (B) (1), XEERKA OHIO ee DIB LOO U ee EEGAY

***Ilmahaygu wuxuu qabaa dhibaatooyin caafimaad oo daba-dheeraaday waxayna u baahan doonaan inay maqnaadaan. Maxaan sameeyaa?***
Haddii ilmahaagu qabo dhibaato caafimaad oo joogto ah sida neefta, cudurka macaanka/sonkorowga, xanuunka suuxdinta/qallalka ama cudurada unugyada dhiigga cas ee la iska dhaxlo (sickle cell anemia) ama cudur kasta oo nafta halis gelin kara oo sababa maqnaansho joogto ah ee dugsiga, **fadlan la shaqee kalkaalisada dugsiga si aad u u-ogaato/u-sahamiso fursadaha suurtogalka ah**.

***Ilmahayga waxa laga helay CAABUQA COVID 19-BAN. Maxaan sameeyaa?***
Haddii ilmahaaga laga helay cudurka COVID19-ban, fadlan raac borotokoolka /hab-raaca nidaamka caafimaadka Dadweynaha/guud Columbus. Ogeysii dugsiga si maalmaha karantiilka/takooridda ee la maq-naa/la seegay loogu cudur daaro.

***Dugsigu ma isoo ogeysiin/sheegi doonaa marka uu ardaygaygu maqan yahay?***
Haa, isku dayo badan ayaa la sameeyaa laakiin waxay ku xiran/xidhan yihiin **saxnaanta macluumaadka aad siiso dugsiga.** Maqnaanshaha ardayga waxaa lagugu ogeysiinayaa habka **wicista tooska ah, wicitaanada taleefoonka macalinka, warqadaha imaanshaha ee maamulaha iyo wicitaanada iyo/ama booqashooyinka guriga.**

***Kuma raacsani maqnaanshaha diiwaanka ilmahayga. Yaan la xiriiraa/xidhiidhaa?***
Khilaafka/is-maan-dhaafka waa in lagu xalliyaa/lagu dhammeeyaa dugsiga. Fadlan isla markiiba la xiriir/xidhiidh dugsiga ilmahaaga oo weydii diiwaanka imaanshaha.

***Waa maxay qeexida maqnaansho joogtada/dabadheeraad ah?***

Maqnaanshaha joogtada ah, sida uu qeexayo Sharciga/Xeerka ku Guulaysiga Arday Kasta, ee ah **ka maqnaanshaha boqolkiiba 10 ama ka badan sanad-dugsiyeedka sabab kasta ha ahaatee.** Waxaa ku jira maqnaansho cudurdaar leh iyo cudurdaar la'aan ah daahitaanno iyo bixitaanno hore.

***Waa maxay qeexidda maqnaanshaha xad-dhaafka ah?***

Sharciga Ohio wuxuu qeexayaa in ardaygu si xad dhaaf ah u maqan yahay " cudurdaar aan dawo/caafimaad ahayn ama cudurdaar sharci ah la'aanteed dugsiga dadweynaha ilmuhu waa inuu dhigtaa **soddon iyo siddeed saacadood** ama **saacado ka badan hal bil-dugsiyeedka, ama shan iyo lixdan saacadood** ama **saacado ka badan oo ah sano-dugsiyeedka.”**

***Maxay ka dhigan tahay inaad si caadi ah uga maqnaanshaha/u-goysmada dugsiga?***

Sharciga Ohio waxa uu ku qeexayaa arday caadaystay maqnaanshaha in uu yahay sida "ilmo kasta oo ku jira da'dii dugsiga qasabka ah ee ka maqnaada cudurdaar la'aan sharci ah ee ka maqnaanshaha dugsiga dadweynaha ilmaha waa in uu dhigaa **soddon saacadood ama ka badan oo isku xigta, afartan iyo laba saacadood ama ka badan hal bil-dugsiyeedka, ama todobaatan iyo laba saacadood ama ka badan hal sano-dugsiyeedka."**

Waa maxay farqiga u dhexeeya maqnaanshaha joogtada ah, ka maqnaanshaha caadada ah/goysmada iyo maqnaanshaha xad dhaafka ah?

| | Saacado xiriir ah/isku xig-xiga | Saacado bil-dugsiyeed kasta ah | Saacadaha sano-dugsiyeedka |
|---|---|---|---|
| Gooysmada/maqnaanshaha Caadiga ah | 30 aan lahayn cudurdaar sharci ah | 42 aan lahayn cudurdaar sharci ah | 72 aan lahayn cudurdaar sharci ah |
| Maqnaanshaha xad-dhaafka ah | -- | 38 leh cudurdaar sharci ah ama aan lahayn cudurdaar sharci ah | 65 leh cudurdaar sharci ah ama aan lahayn cudurdaar sharci ah |
| Maqnaanshaha joogtada ah | -- | -- | 10% leh cudurdaar sharci ah ama aan lahayn cudurdaar sharci ah |

***Maxaa dhacaya haddii ilmahaygu caadiyan goynayo/maqan yahay?***

Marka ardaygu **si caadi ah u gooyo/umaqan yahay**, waxa soo socdaa dhici doona:

- **Toddobo maalmo-dugsiyeed gudaheed** ee sababta ka qaadista talaabo shaci ah ee maqnaanshaha, degmadu waxay:
  - Doorar/xulan doontaa xubno ka tirsan kooxda faragelinta maqnaanshaha; iyo
  - Sameysaa saddex isku day oo macno leh si ay uhubiso ka qayb-galka waalidka ee ardayga, wakiilka ilmaha masuulka ka ah, gar-yaqaanka (ilaaliyaha ad litem), ama ilaaliyaha ku meel gaadhka ah ee kooxda faragelinta maqnaanshaha.
- **10 maalmood ee ah maalmaha kaalendharka** gudahood laga bilaabo sababta qaadista talaabo shaci ah ee maqnaanshaha, ardayga waxaa lagu meelayn doonaa kooxda faragelinta maqnaanshaha ee la doortay; 16
- **14 maalmo-dugsiyeed** gudahood ah ka dib meelaynta kooxda, degmadu waxay horumarin doontaa qorshaha faragalinta maqnaanshaha ardayga;
- **Todobada cisho/maalmood** ee gudaha kalendarka ka dib marka qorshaha la sameeyo/la hormariyo, degmadu waa inay samayso dadaal macquul ah oo ay ku siinayso ogaysiis qoraal ah waalidka ama masuulka ardayga; iyo
- Ardaygu wuxuu haystaa **60 maalmood oo ah kalendarka** si uu uga qayb-qaato oo uu ugaaro/ugaadho/u sameeyo horumar lagu qanco ee ah qorshaha. Haddii ardaygu aanu ka qayb-galin ama uusan samayn horumar lagu qanco oo ku saabsan qorshaha, sida ay go'aamiyeen kooxda faragalinta maqnaanshaha, sarkaalka xaadirinta/imaanshaha waa in uu ka xareeyaa dacwad/ashtako maxkamada caruurta/dhalinyarada ee ka dhan ah ardayga **maalinta 61-aad ee kaalendharka/taariikhda** ka dib fulinta qorshaha faragalinta maqnaanshaha. Haddii wakhti kasta inta lagu jiro marxaladda hirgelinta ee qorshaha faragalinta maqnaanshaha ee uu ardaygu maqan yahay cudurdaar la'aan **30 ama ka badan oo isku xigta ama 42 saacadood ama ka badan hal bil-dugsiyeed gudaheed**, degmadu waa in uu sarkaalkeeda xaadirinta/imaanshada u soo gudbiyaa dacwad/ashtako ka dhan ah ardayga. Shuruuddan ma saamayso/khusayso haddii kooxda faragalinta maqnaanshaha ay go'aamiyeen in ardaygu horumar la taaban karo ka sameeyay qorshaha faragalinta maqnaanshaha.

***Dugsiga ma looga baahan yahay inuu bixiyo dib-uqaadashada shaqadii/hawlihii/waajibaadkii uu gafay marka ilmahaygu uu maqan yahay, oo ay ku jirto markii layga joojiyey/layga saaray dugsiga?***

Haa. Shaqada/hawlaha waa in waalidka ama ardaygu codsadaa sida ugu dhakhsaha badan. Dugsiyada intooda badan waxay u baahan yihiin 24-saacadood si ay ugu oggolaadaan macalinku inuu soo ururiyo agabka/qalabka si uu guriga oogu soo dirayo.

***Sideen ku heli karaa nuqul ka mid ah diiwanka imaanshaha ardaygayga?***

Waxaad ka codsan kartaa nuqulka diiwaanka imaanshaha ardaygaaga xafiiska dugsiga wakhti kasta.

***Ka waran/maxaa dhacaya haddii uu ardaygaygu ka maqan yahay dugsi ka joojinta/ganaaxid awgeed/darteed?***

In kasta oo ka joojinta/ganaaxidda loo arko maqnaansho cudurdaar la'aan ah, waa inaysan ku xisaabtamin/lagu tirinin goysmada ka manqnaansha waxa ay keentaa sababta ka qaadista talaabo shaci ah oo ah ka joojinta/ganaaxidda oo waxay ka dhigan tahay cudur daar sharci ah ee ka maqnaanshaha dugsiga. Ka joojinta/ganaaxidda waxaa lagu xisaabiyaa maqnaansho xad dhaaf ah sababta oo ah qeexida maqnaanshaha xad dhaafka ah ma kala sooc-no sababaha sharciga ah iyo

kuwa aan sharciga ahayn ee ka maqnaanshaha dugsiga.

***Sideen uga cudur daaran karaa ka saaridda/ka qaadista dugsiga waqti hore ilmahayga?***
Waalidka/Masuulka ayaa u saxiixa ardayga ka saarista/ka bixitaanka dugsiga oo bixiya dukumiinti taageeraya maqnaanshaha cudurdaarka leh. Arday kasta oo ka taga/ka baxa dugsiga oo aan haysan qoraal/warqad sax ah waxaa loo tixgelin doonaa maqnaansho aan cudurdaar lahayn.

***Maxaa dhacaya marka baska dugsigu uu soo daaho?***
Marka dugsigu masuul ka yahay ardayda soo daahday, waxaa lagu calaamadayn doonaa maqnaansho cudurdaar leh (marka la xaqiijiyo). Ardaydaas waa inay iska xaadiriyaan/soo maraan Xafiiska Guud si ay u helaan kaarka/warqadda/u gudubka fasalka.

***Sidee bay muddada sugitaanka gaadiidku u saameeyaa imaanshaha ilmahayga/ubadkayga?***
Tan waxaa la adeegsadaa marka maqnaansho ay sababto dib u dhac ku yimid jadwalka gaadiidka degmada la siiyay, waxaa lagu calaamadeyn doonaa maqnaansho cudur daar ah.

***Ardayda 18-ban jirka ah ma ka cudur daaran karaan maqnaanshahooda?***
Ardayda si sharci ah 18-ban sano jirka ah waxay qori karaan qoraalada maqnaanshaha ee naftooda.

***Fasax ma qaadan karaa inta lagu jiro sano-dugsiyeedka?***
Jadwalka kaalendharka dugsiga waxaa ku jira dugsi "fasaxeedyada" dugsiga ama wakhtiga fasaxa. Mar kasta oo ay suurtogal tahay, fasaxyada qoysku waa inay la socdaan maalmaha fasaxa dugsiga. Fasaxu maaha sabab la oggolaaday maqnaanshaha gudaha dawladd-goboleedka Ohio. Haddii maqnaanshaha ay tahay arrimo waxbarasho; waalidka/masuulka waxay u baahan doonaan inay la xiriiraan/xidhiidhaan dugsiga ka hor maqnaanshaha si ay u helaan hawlo shaqo/jaawibaadka oo ay tahay in la dhammeeyo marka ardaygu ku soo laabto dugsiga.